

## Kordhinta xulashooyinka xoojinta KOOFID-19 ee 18 jir iyo wixii ka weyn

Luulyo 19, 2022

---

Helitaanka qiyaasta labaad ee xoojiya tallaalka KOOFID-19 waxay siin doontaa dadka reer Alberta doorashooyin badan oo ku saabsan kordhinta ka-hortagga CKOOFID-19 iyadoo lagu salaynayo xaaladahooda halista ah.

Dadka reer Alberta waxay filan karaan inay arkaan xilliyo kororka gudbinta KOOFID-19 illaa xagaaga, deyrta iyo jiilaalka, oo ay la socdaan cudurrada kale ee neefsashada sida hargabka.

Kala duwanaanshaha Omikaron (Omicron) BA.5 waa cadaadiska ugu badan ee Alberta hadda. Xogtu waxay sheegaysaa in kala duwanaanshiyahani uu yahay mid la gudbin karo laakiin ma tilmaamayo khatarta sii kordheysa ee natiijooyinka daran. Kordhinta helitaanka qiyaasaha labaad ee KOOFID-19 waxay siin doontaa dadka reer Alberta halista ku jira doorashooyin badan oo ku saabsan kordhinta ilaalintooda muddadan kororka gudbinta bulshada.

Laga bilaabo Luulyo 20, dadka reer Alberta da'doodu tahay 18 sano iyo ka weyn waxay dooran karaan inay balamo u samaystaan kuuradooda xoojin labaad oo tallaalka mRNA ah shan bilood ama ka badan ka dib markay helaan qiyaasta xoojisa ee ugu horreysa. Kuuradani waxay faa'iido badan u leedahay kuwa halista sare ugu jira natiijooyin daran.

### Qabso ballanta kuurada xoojinta labaad

Laga bilaabo Luulyo 20, dadka reer Alberta ee jira 18 sano iyo ka weyn waxay qabsan karaan ballamaha qiyaasta labaad ee xoojinta shan bilood ka dib markay helaan qiyaastoodii ugu dambeysay. Ku qabso khadka tooska adoo isticmaalaya nidaamka ballansashada tallaalka Alberta [booking system](#) ama wac 811. Dooro farmashiyeyaasha aan ballan qabsashada u baahneyn.

Waxa kale oo lagu talinayaa in la sugo ugu yaraan saddex bilood ka dib infekshanka KOOFID-19 ka hor inta aan la helin qiyaas xoojin ah.

### Xoojiyaha kuurada Janssen

Dadka reer Alberta oo helay hal kuuro oo Janssen ah ugu yaraan laba bilood ka hor hadda waxay xaq u leeyihiin qiyaas xoojin ah. Sahayda oo kooban awgeed, ballamaha waxa lagu qabsan karaa oo keliya in la waco 811.

Booqo [alberta.ca/vaccine](https://alberta.ca/vaccine) si aad u hesho tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan taxanaha aasaasiga ah iyo qiyaasaha xoojinta.

### Xog la xiriirta

- Diiwaanada iyo tallaalka KOOFID-19 ([COVID-19 vaccines and records](#))

The logo for Alberta's Recovery Plan features the text "ALBERTA'S RECOVERY PLAN" in white, bold, uppercase letters. The text is enclosed in a white rectangular border that is partially open at the top and right sides. A yellow vertical bar is positioned to the right of the text, and a yellow horizontal bar is positioned above the text, meeting at a right-angle corner.

## **ALBERTA'S RECOVERY PLAN**

Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.